



# MASHINKAN WAXAA LOOGU TALA GAHLEY IN AAD KU ISTICMAASHO GURA . WAA INAAD NADIIFISAA MASHIINKA. MASHIINKA WAXAA LA YIRAAHDAA Mic- Keys® Gastrostomiport

## ARIMAHAAN WAA MUHIIM INAAD SAMEYSO HAL JEER MALINTII:

1. Dhaq meesha uu mashiinka ku xiran yahay maalin kasta adigoo uga fikaraaya sida aad maalintii iyo habeenkii aad u nooshay. Jirka uu mashiinka ku xiran yahay waa inuu noqdaa mid qalalan isla markaana nadiif ah
2. Waa inaad dhaqdaa mesha uu xariga ama caaga iska galaayo adigoo isticmaalaaya biyo ay qiyaastoodu tahay 10-20ml. dhaqitaankaasi waxaad sameyneysaa ka hor iyo kadib intaadan raashiinka qaadan.

## ARINTAAN WAA MUHIIM INAAD SAMEYSO ISBUUC KASTA:

1. Waa inaad hubisaa hal jeer isbuucii in caaga biyaha ay yihiin kuwo kuugu filan
2. Waa inaad bedeshaa tubada caaga har jeer isbuucii ama hadii aad aad u isticmasho. ( waxay ku xiran tahay isticmaalkaaga inta uu la eg yahay )

## ARINTAANI WAA MUHIIM INAAD SAMEYSO LABADII ISBUUC MAR:

1. Waa inaad soo bixisaa Mic-Key® meesha uu caloosha uga jiro. Kadib waa inaad dhaqdaa kadina u qalajisaa si wanaagsan.

## ARINTAANI WAXAA LAGAA RABAA INAAD SAMEYSO LABADII BILOOD MAR:

- Waa inaad u aragtaa Mic-Key® si mashiin kaa caawinaaya raashiin cunida, sidaas awgeed waxaa muhiim ah inaad bedesho Mic-key® labadii bilood mar. Maxaa yeeley waxaa laga yaabaa inuu tubada gudeheeda ay noqoto wasaq. Taasi waxay keeneysaa in aad arki weydo xawaaraha uu raashiinka ku socdo. Mararka qaarkood si tartiib ah ayaa raashiinka qofka tubada loogu siiyaa. Waa inaad bedeshaa labadii bilood mar.

*Waa muhiim! Haddii uu xanuun ku qabto markaad istismaaleysid mashiinka raashinka, waa inaad si deg deg ah ula xirirtaa kalkaaliya caafimaadka ama dhaqtarkaaga.*





## Waano wanaagsan

1. Mar walba waa inaad la socotaa cabirka inta uu la eg yahay adigoo isticmalaaya Mic-Key®. Waa inaad mar walba la socotaa cabirka si uusan kuu dhaawicin.
2. Waa inaad sameysataa qorsho wanaagsan sidii aad u baran laheyd Mic-Key® :
  - Tusaale ahaan waa inaad cabirtaa in caaga biyaha ay ku jiraan biyihii loogu tala galey.
  - Sidoo kale waa inaad soo bixisaa Mic-Key® oo aad nadiifisaa ama dhaqdaa maalin kasta oo ah sabti.
3. Waa inaad ka fikirtaa nololaha adigoo eegaaya nadaafada Qiimaha ay leedahay. Waxaad ogaataa in mashiinka Mic-Key® uusan u baahneyn in biyo kulul lagu karyio.